

TILMAAN


Saamigaagii aad iska-qaadeyso covid-19

Akhri tilmaamaha oo dhan si taxadir ah intaadan bilaabin inaad iska qaado saamiga.

Midaan waa muhiim in qaybaha oo dhan la sameeyo si aad adiga jawaab uga hesho saamigaaga.

Si aad u diiwaangeliso saamigaaga waxaa laguugu xirayaa aqoonsiga elektarooniga

Baqshada waxa ku jira



Diyaarista saami qaadista

1. Soo bixi dhalada saamiga lagu qaadayo iyo sidoo kale dhalada biyaha cusbada ay ku jiraan.
2. Fur dhalada biyaha cusbada ee la karkariyey taasoo aad wareejineyso madaxeeda kore.
3. Ku shub biyihii cusbada ee la karkariyey oo dhan dhalada saamiga lagu qaadayo ,sii hay dhaladii saamiga ama meesha saar si aysan u lic-liicin oo ay si fiican u taagan tahay.

1177
VÄRDGUIDEN



Dhuunta laqida – saami qaadista 1

1. Soo bixi qoriga saamiga lagu qaado iyo geli canka gudahiisa dalqada Hoos ilaa dhuunta laqida aad gaari karto.
2. Ku xoq inta hore ee suufka qiyaas 20 ilbiriqsi dhinaciiba ilaa meesha ugu Hooseysa dhuunta.
3. Soo bixi qoriga saamiga lagu qaado kana soo bixi dhuunta.



20 sek

Sanka – saami qaadista 2


1. Qoriga suufka kor ku leh geli sanku gudihiisa 2-3 sentemeter. Ku xoq qiyaas 20 ilbiriqsi. Labada sanba sidaas u samey.
2. Soo bixi qoriga saamiga lagu qaado kasoo bixi sanku iyo gacanta ku hay.



20 sek

Candhuufta – saami qaadista 3

1. Soo bixi koobka candhuufta lagu tufaayo iyo ku tuf dhowr jeer si uu u buuxsamo gudihiisa si fiican.
2. Soo bixi qoriga saamiga lagu qaado iyo ku rug-rug candhuuftii koobka Ku jirtay 20 ilbiriqsi.
3. Hoos u geli qoriga saamiga lagu qaado ee suufka kor ku leh geli dhalada saamiga lagu qaado iyo ku walaq wareegeeda qiyaas 20 ilbiriqsi.



20 sek

4. Kasoo bixi qoriga saamiga lagu qaado dhalada saamiga iyo ku xir furkeeda si taxadar ah.
5. Dib u fiiri laba jeer in dareerihii uu ku jiro dhalada saamiga lagu qaado iyo in furkii si fiican ugu xiran yahay.
6. Hoos u geli dhalada saamiga lagu qaado baqshada yar ee saamiga iyo xir.

U gedi dhinaca ►


Tuur wixii soo haray

Dib ugu rid koobkii candhuufta lagu tufay, qoriga iyo wixii qalab kale ah oo la isticmaalay warqada weyn ee qalabka markii hore ay ku jireen iyo kadibna ku tur meesha qashinka lagu tuuro ee guriga.

Diiwaangeli saamigaaga – gal halkaan 1177.se

Si sheybaarka baarista ku sameynayo saamigaaga ay u ogaadaan qofka saamigaan iska leh waxaad ku khasban tahay inaad ku xirto tobankaaga nambar. Saas darteed waa khasab adiga inaad isku cadeeyso aqoonsiga elektarooniga ah marka aad diiwaangelineyso saamigii.

1. Halkaan adiga waxaad ka heleysaa NAQSHADA-koodka adiga kuu khaaska ah.
2. Saar NAQSHADA-koodka (QR-kod) moobiilka kaameradiisa oo ku sawir ama mid NAQSHADA-appka, Raac jihada leys tusinaayo iyo gal. Haddii aadan awoodin inaad ka akrisato NAQSHADA-koodka (QR-kod) moobiilkaaga waxaad awoodaa inaad furto websaytka laga galo iyo ku qor cinwaankaan : <http://pep.1177.se/tesikii> Gal iyo diiwaangeli tirooyinka hoosta uga qoran NAQSHADA-koodka (QR-kod).
3. Ku qor warbixinada leyska rabo.
4. Riix halkaan dhameytir dalabkii



Gee saamigaagii si loo baaro

Markii aad fulisay talaabooyinka kor ku xusan oo dhan gee saamigaagii sidii horaba tilmaamaha lagu siiyey markii aad heshay xirmadii saami qaadista.

Gee sida ugu dhaqsaha badan oo ay kugu suurtagaleyso saamiga maadaama aad iska qaaday saamiga.

Heyso mida tilmaamaha ee NAQSHADA-koodka (QR-kod) ilaa inta aad ka heleyso jawaabta saamiga.

Jawaab saami

Adiga waxaad heleysaa jawaabtaadii saamiga 2 maalmood gudahood xaga adeega elektarooniga halkaan 1177.se

Gal halkaan 1177.se, riix halkaan **"Beställ provtagning och se svar"** cinwaanka hoostiisa **Egen provhantering.**

Haddii aad ansixisay ogeysiinada ka yimaadaa 1177.se waxaad heleysaa adiga ogeysiin xaga sms ama e-maylka (e-post) markii jawaabtii saamiga ay timaado.

Hadaadan helin jawaab saamigii 3 maalmood kadib waxaad u direysaa fariin xaga e-maylka (e-post):

egenprovtagningcovid19@regionvarmland.se

U sheeg arintaada waxay ka hadleyso adigoo soo gaabiyey iyo taleefoon nambar aan kaa heli karno. Haku dirin weligaa tobanka nambar xaga e-maylka (e-post).